

Badqabidda Shaqada: COVID-19 iyo Shaqadaada

Waa in badqabid lagu haysto Wisconsin si loogu noolaado Wisconsin. Meheradaha dantooda koowaad waa baahida shaqaalaha.

Waxaan u maleynayaa inaan COVID-19 shaqada ka soo qaaday. Maxaan la iga rabaa inaan sameeyo?

- Si degdeg ah ugu sheeg maamule ama goobta shaqada.
- Xanuunka iska soo baar. Garaac 211 si laguugu sheego goobaha baarista ee kuu dhow, ama adiguba goobaha baarista dadweynaha ka baaro <https://www.dhs.wisconsin.gov/testing>, ama la xiriir dhakhtarka aad u tagto.
- Waxaa laga yaabaa xafiiska caafimaadka dadweynaha ama qabiillada dhaladka ah inay kuu sheegaan in aadan shaqo aadin oo aad guriga joogto ilaa 14 maalmood si aad ula socoto in aysan calaamado kugu soo bixin, xataa haddii baaris ka dib xanuunka lagaa soo waayo. Wixii faahfaahin ah ka eego <https://www.dhs.wisconsin.gov/publications/p02598a.pdf>.
- Haddii si buuxda lagaaga tallaalay COVID-19 balse uu xanuunka ku qaadsiiyey qof qaba COVID-19, waxaa laga yaabaa in aadan u baahan karantiilid. Booqo <https://www.dhs.wisconsin.gov/covid-19/close-contacts.htm> oo ka eego faahfaahin.

Sidee baa la iigu caawin karaa ceymiska caafimaadka, daryeel caafimaad, ama taageero ah dhimirka?

Gobolka Wisconsin, daryeel ayaa dadka loo hayaa si uu qof kasta u helo badqabid.

- Faahfaahinta meel aad ka heleyso ceymiska caafimaadka, meelo qiima jaban ama lacag la'aan ah, iyo taageero ah caafimaadka dhimirka ka eego barta intarnetka ee DHS COVID-19 <https://www.dhs.wisconsin.gov/covid-19/help.htm>.
- Waxaad daryeelka caafimaadka ee Wisconsin ka eegan kartaa baraha intarnetka ee Wisconsin Primary Health Care Association (Ururka Caafimaadka Daaweynta Guud ee Wisconsin) <https://www.wphca.org/page/FindHealthCenter> ama Wisconsin Association of Free & Charitable Clinics (Ururka Kilinigyada Bilaashka ah & Kuwa Tabarrucaad ah) <http://www.wafcclinics.org/find-a-clinic.html>.
- Waxaad faahfaahinta goobo qiima-jaban ka heli kartaa bogga macluumaadka COVID-19 ee DHS <https://www.dhs.wisconsin.gov/covid-19/help.htm>, ama Well Badger Resource Center (Xarunta Macluumaadka Fayaqabka ee Badger) <https://www.wellbadger.org>.
- Xaalad degdeg ah markay dhacdo, imarjansada isbitaalka miyey celin karaan bukaanka u yimaada.
- Haddii ay jiraan dumar uur leh, Wisconsin ayaa u haysa daryeel caafimaad oo bilaash ah, haddii aysan sharci haysan ama haddii ay yihiin muwaadiniin. Soo garaac 800-362-3002 oo ah ceymiska BadgerCare Plus Prenatal Plan (Qorshaha Daryeelka Dumarka Uurka Leh).

Haddii aan ahay shaqaale soo-galooti ah. Halkee ka heli karaa daryeelka caafimaadka ee aan rabo?

Waxyaabaha kor lagu soo qoray waxaa sii dheer:

- Family Health La Clinica ayaa meelaha miyiga ah ee Wisconsin ku leh shan goobood oo ah daryeel caafimaad. Booqo <https://www.famhealth.com/locations.html> ama soo garaac 800-942-5330 si laguugu sheego kilinig kuu dhow.
- Faahfaahinta soo-galootiga iyo manaafacaadka dowliga ka eego <https://www.coveringwi.org/immigration>.

Haddii aanan ku badqabin goobta aan ka shaqeyso. Maxaan sameyn karaa?

Goob si gaar ah loo leeyahay markaad ka shaqeyso:

- Haddii aad u sheegi karto, la hadal goobtaad ka shaqeyso ama xafiiskooda shaqaalaha (HR) u sheeg welwelkaaga.
- Soo gudbi cabasho ah caafimaadka iyo baqabidda oo aad ka heleyso Occupational Safety and Health Administration (Maamulka Caafimaadka iyo Badqabidda Shaqada ama OSHA) at <https://www.osha.gov/>. Cabashooyin badan baa soo gaara xafiiska OSHA. Waxaa jira sharciyo difaaca dadka cabasho ka soo gudbiya goob shaqo oo dhib kama soo gaari karo. Waxa kale oo lala hadli karaa shaqaalaha OSHA. Xafiiska kuugu dhow ee OSHA ka eego <https://www.osha.gov/contactus>.
- Wisconsin's Department of Workforce Development (Waaxda Horumarinta Shaqaalaha ee Wisconsin ama DWD) ayaa macluumaad dheeraad ah kuugu haysa <https://dwd.wisconsin.gov/wc/safety/>.

Waxaan ka shaqeyaa gobolka ama dowladda hoose:

- Xafiiska shaqaalaha ee goobta aad ka shaqeyso weydii sharciga khuseeya COVID-19. Haddii aan dhib kaaga imaaneyn, maamulaha u sheeg wixii dhib ah oo ku haysta.
- Waxaad farriin u soo diri kartaa Department of Safety and Professional Services (Waaxda Badqabidda ee Adeegyada Xirfadleyaasha ama DSPS) oo kala soo xiriir dpsSbHealthAndSafetyTech@wisconsin.gov, ama cabasho ku soo gudbi bogga internetka ee DSPS <https://dpscomplaintform.wi.gov/dpslsconlinecomplaint.aspx>.

Haddii aadan COVID-19 awgiis ku badqabin shaqadaada. Maxaan sameyn karaa haddii aan dhib kala kulmo goobta aan ka shaqeyop (aargoosi)?

- Waxaa jira sharciyo dadka lagu difaaco (ama difaacidda dacwad-keenaha) oo ah inaan aargoosi la sameyn karin. Haddii si sharci darro shaqada lagaaga eryo, lagu ruqsiiyo, lagu dhibo, lagu diido dallacsiin, ama lagaa yareeyo saacadaha shaqada, waxaad soo codsan kartaa cabashada difaacidda dacwad-keenaha OSHA <https://www.osha.gov/whistleblower/WBComplaint.html>.
- Haddii aad tahay shaqaalaha gobolka, cabashadaada ku soo gudbo DWD (Waaxda Shaqaalaha) Wisconsin <https://dwd.wisconsin.gov/er/civilrights/retaliation/>.

Haddii aan laguula dhaqmin si caddaalad ah oo ay sababtu tahay isir, qowmiyad, asal hore, xaalad soo-galooti, da', jinsi, ama naafannimo. Sharciga miyey jebinayaan?

Haa. Hoos ka akhriso waxyaabaha aad sameyn larto:

- Haddii aan dhib kaaga imaaneyn, shaqada, maamulaha, xafiiska shaqaalaha u sheeg wixii dhib ah oo ku haysta.
- Waxaad cabasho ah takoorid u soo gudbisan kartaa DWD Guddigeeda Sinnaanta Fursadaha Shaqaalaha <https://dwd.wisconsin.gov/dwd/forms/erd/erd-4206-e.htm>. Waxaad sidoo kale la soo xiriiri kartaa 608-266-6860 ama 414-227-4384, ama DWD farriin ugu soo dir erinfo@dwd.wisconsin.gov.

Waxaa la ii sheegay inaan guriga joogo oo aan galo karantiilid ama isku keli-yeelo. Lacagteydii shaqada miyaan qaadan doonaa?

- The Families First Coronavirus Response Act (Sharciga Jawaabta Faayruska Karoonaha ee Qoyska ama FFCRA) wuxuu goobaha shaqada shuruud uga dhigay in ay lacag ku siiyaan shaqaalaha u maqnaada sababo la xiriiira COVID-19, ugu yaraan ilaa iyo 31-ka Diseembar, 2020. Faahfaahinta ka eego <https://www.dol.gov/agencies/whd/pandemic/ffcra-employer-paid-leave>.
- Si aad wax u ogaato waxaad ka eegi kartaa habraaca <https://www.dol.gov/agencies/whd/ffcra/benefits-eligibility-webtool> haddii aad xaq u leedahay FFCRA.

- Waxaad xaq u yeelan kartaa fasaxyo kale oo aad mushaar ku qaadato, sida fasaxa xaaladaha degdegga ah ee qoyska ama ceymiska shaqa-la'aanta. Faahfaahinta barnaamijyadaas ka eego bogga shaqaalaha ee DHS COVID-19 <https://www.dhs.wisconsin.gov/covid-19/employers.htm>.

Haddii aysan shaqadeydu bixin fasax COVID-19 lacag ah. Sidee baan ku helayaa xuquuqdeyda?

- Shaqa kasta shuruud kuma aha bixinta fasax lacag ah.
- Weydii shaqadaada fursadaha fasaxa ah ee aad lacagta ku heli karto.
- La xiriir Worker's Rights Center (Xarunta Xuquuqda Shaqaalaha) <https://workerjustice.org/> oo weydiiso macluumaad iyo caawimaad. Garaac 608-255-0376, ama farriin ku soo dir kristen@workerjustice.org ama socorro@workerjustice.org.
- La xiriir U.S. Department of Labor at (Waaxda Shaqaalaha) <https://www.dol.gov/agencies/whd/covid-response>, or call 866-487-9243.
- DWD (Waaxda Horumarinta Shaqaalaha) Wisconsin ayaa boggooda kuugu haya macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Family and Medical Leave Act (Sharciga Fasaxa Xaaladaha Degdegga ah ee Qoyska ama FMLA) <https://dwd.wisconsin.gov/er/civilrights/fmla/>.
- Iskuulka Wisconsin wuxuu Shaqaalaha u hayaa buug-yare ku saabsan COVID-19 iyo xuquuqda shaqaalaha oo waxaad ka heleysaa <https://schoolforworkers.wisc.edu/wp-content/uploads/sites/795/2020/04/COVID-19-Legal-Rights-Booklet.pdf>.

Haddii qoyskeygu u baahan yahay cunto, taageerada caafimaadka dhimirka, ama guri. Halkee baan caawimaad ka heli karnaa?

Si aad gobolka oo dhan uga hesho caawimaad ah cuntada iyo baahiyaha kale, soo garaac 2-1-1 ama booqo <https://www.dhs.wisconsin.gov/covid-19/help.htm> or <https://211wisconsin.communityos.org/>.

